

# Cudurka Xabada (Chlamydia)

(waxaa sababa *Chlamydia trachomatis* baakteeriya)

## CALAAMADAHA IYO SAANSAANTA XANUUNKA

- Dadka badankood xanuun ma dareemayaan
- Marka la qaado waxay soo baxaayaan muddo 7-21 cisho gudahood, amaba ma soo baxaayo

Dumarka:

- Dhiig ama dheecaan aan caadi ahayn oo cawrada dumarka ka yimaada
- Ay gubayso iyo xanuunayso marka la kaadinayo
- Xanuun caloosha hoose ah
- Dabada oo xanuunta

Ragga:

- Wax biya biya ah ama dheecaan cad ee guska ka yimaada
- Ay gubayso iyo xanuunayso marka la kaadinayo
- Dabada xanuunayso

## ISQAADSIINTA

Xabada (Chlamydia) waxaa laysku qaadsiiya:

- Galmada siilka
- Galmada afka
- Galmada dabada
- Hooyada iyada oo xanuunkan qabta ilmaha dhalanaya qaadsiiisa

## CILLADAHA

Haddii aan la daawayn, chlamydia waxay sababi kartaa:

- In dadka lala galmoodo la qaadsiiyo
- Keeni karta in uur ku abuurmo markaanka banaankiisa (Tuubooyinka)
- Keeni karta caalir ku dhaca lafta misigta ka hoosyasa ee ilma galeenka iyo kaadi hastaba (PID)
- Keeni karta dhalma la'aan raga iyo dumarka
- Sahli karta inaad qaadid ama gudbisid HIV xilliga galmada

Xiliga uurka, caabuqa Xabada:

- La qaaadsiin kara ilmaha dhashay xiliga dhalida, sababani karta caabuq culus oo isha iyo sanbabka (pneumonia) ah
- Waxay keeni kartaa dhalashada waqtiga ka hormarta ama ku dhalashada culays yar

## KA HORTAGISTA

- Laga fogaado galmada siilka, afka, dabada waa si uga wanaagsan ee STDs looga hortagayo.
- Komdomka caaga ah, marka sidii loogu tala galay iyo sida saxda ah loo isticmaalo, waxa uu yarayn karaa halista in Xabada la qaado marka meelaha jirran la daboolo ama komdomka la isticmaalo.
- Komdomka caaga markasta la isticmaalo marka galmada siilka ama dabada la samaynayo.
- Kondomka caagga guska lagu xirto u isticmaal galmada afka.
- Caag ku difaacayo (wax ilkaha difaaca ama komdom dhaxda laga goo'yay) galmada afka, siilka ama dabada loo isticmaalo.
- La yareeyo dadka lala galmoodo.
- Sida u dhaqsa badan loogu sheego dadka lala galmoodo haddii aad caabuqdo.
- Dadka lala galmoodo ee caabuqan waa in isku mar baaritaan laga qaado lana daaweeyo si dib ugu caabuqida looga hortago.

## BAARITAANKA IYO DAAWAYNTA

- Baaritaan caafimaad dhakhtar haa qaado haddii caabuq la tuhmo.
- Xabada waxaa lagu daawayn karaa ayadoo daawada uu shaqaalaha caafimaadka soo qoray la qaato.
- Dadka lala galmoodana waa in isla markaa ayagana la daaweeyo.

OGOW: Qofka laga daaweeyay markale ayuu caabuqa qaadi karaa.

### MACLUUMAAD DHEERAADA, LA XARIIR:

Minnesota Department of Health  
STD and HIV Section  
(Waaxda Caafimaadka Minnesota)  
(Qaybta STD iyo HIV)  
(651) 201-5414  
[www.health.state.mn.us/std](http://www.health.state.mn.us/std)

Minnesota Family Planning and STD Hotline  
(Qorshaynta Qoyska Minnesota iyo Khadka STD)  
1-800-783-2287 Codka/TTY;  
(651) 645-9360 (Magaalada iyo Degaanada)  
[www.sexualhealthmn.org](http://www.sexualhealthmn.org)

American Social Health Association (ASHA)  
(Iskaashatada Caafimaadka Bulshada American ka - ASHA)  
[www.ashastd.org](http://www.ashastd.org)

CDC National STD and AIDS Hotlines  
(CDC National STD iyo Khadka AIDS ka)  
1-800-CDC-INFO; 1-888-232-6348 TTY  
[www.cdc.gov/std](http://www.cdc.gov/std)